



Providing Benefits to Oregon Homecare
and Personal Support Workers

Benefit Trust

Wakhtiga fasaxa lacagta la bixiyo (PTO): Su'aalaha Joogtada La Isku Waydiiyo

Imisa saacadood ayey PTO ay kasban kartaa?

Haddii aad u qalanto PSW ama HCW, aad kasban karto 20 saacadood oo dheefaha PTO Febraayo 1deeda oo kasta iyo Juulay 1deeda wadar ah 40 saacadood oo dheefta PTO ah sanad kasta, kuwaas oo loogu talo galay in loo isticmaalo iyaddoo ku xidhan qaadashada wakhtiga fasaxa ee saacadaha si caadi ah loogu qorsheeyay macmiilka.

Sidee dheefahayga PTO loo xisaabiyaa?

Dheefahaaga PTO waxaa lagu go'aamiyaa iyaddoo ku salaysan wadarta mushaharka la shaqaystay bisha koowaad ee u qalmida muddada go'aanka kuwaas oo aad shaqaysatay 80 ama saacado ka badan shaqada la daboolo. Haddii aad qiimayso isbeddelada mushaharka, dheefahaaga PTO waxaa loo xisaabin doonaa iyaddoo ku salaysan qiimaha mushaharkaaga muddada bisha aad marka koowaad u qalanto wareeg kasta oo dheefaha ah.

Sideen u codsadaa dheefaha PTO?

Haddii aad ka shaqaysay tirada loo baahan yahay ee saacadaha si loo shaqaysto dheefta PTO, Xarunta bixinta dheefta waxay boosta kuugu soo diraysaa xidhmada u qalmida ka kooban Foomka Codsiga Dheefta, Foomka W-9, Foomka Magacaabida Ka faa'iidaystaha iyo warqadda hore boosta loo sii bixiyey. Waa inaad buuxisaa oo ku soo celisaa Foomka W-9 Xafiiska Maamulka Khasnada si aad ugu qalanto dheefaha PTO si waafaqsan Xarunta bixinta dheefta. Markaad diyaar u tahay inaad hesho lacag bixinta dheefahaaga PTO, waa inaad buuxiso oo gudbisaa Foomka Codsiga Dheefta ku jira xidhmadaada u Qalmida.

Bal ka waran haddii aanan codsan dheefaha PTO?

Haddii aanad u qalmin inaad hesho dheefaha PTO laakiin aanad dhammaystirin Foomka Codsiga Dheefta, dheeftaada si toos ah ayaa lagu siin doonaa Febraayo sanadka ku xiga



P.O. BOX 6, MUKILTEO, WASHINGTON 98275

Trust Administration: 844-507-7554 | fax: 866-459-4623 | email: OHCWT@vimly.com | website: orhomecaretrust.org

The benefits of the Homecare Workers Supplemental and Benefit Trusts were negotiated by SEIU Local 503 homecare and personal support workers through their bargaining team. PTO003 | 2073847v1
Revised June 2019

sanadka aad kasbatasy. Fiiro, uma qalmi doontid dheefaha PTO ilaa aad buuxiso oo soo celiso Foomka W-9. Waxaad uga soo gudbin kartaa W-9 si amaan ah onlayn addoo maraya DocuSign.

Waa maxay muddada wakhtiga sheegashda dheefaha PTO?

Si loo helo dheefta PTO 15ka ee bisha, waa inaad gudbisaa, oo xarunta bixinta dheeftu heshaa, dhammaan caddaymaha loo baahan yahay 5ta bishaas. Si aad u hesho dheefta PTO Jimcaha u dambeeya ee bisha, waa inaad gudbisaa, oo Goobta bixinta dheefta ay heshaa, dhammaan caddaymaha loo baahan yahay 20ka bishaad.

Ma heli doonaa Foomka 1099?

Haddii dheeftaada PTO ay ka badan tahay \$600 sanad keliya, Xarunta bixinta dheefaha waxaa looga baahan yahay inay kuu soo diraan adiga Foomka 1099. Fadlan ogow in dheeftaada PTO looga fekero dakhli la cashuuri karo muddad asanadka aad kasbato, iyaddoon loo eegin haddii aad ka hesho Foomka 1099 Xarunta bixinta dheefta.

Sideen ku helaa adeeg bixiyaha daryeelka taageerada ah ee Macmiilkayga/Loo shaqeeyaha muddada wakhtiga fasaxa?

Masuuiyadaada maaha inaad hesho beddelkaaga marka aad qaadato fasaxa shaqada la bixiyo. Macmiilka/Loo shaqeeyaha waxa uu leeyahay masuuliyada koowaad ee xulashada shaqaalaynta adeeg bixiyahooda. Fasaxa

mushaharka la bixiyo waa inuu hore u sii oggolaadaa Macmiilka/Loo shaqeeyaha, fasaxs waa in la heli karaa haddii loo baahdo oo Wakaalada ku habboon waa in lagu wargeliyaa si loo oggolaado saacada Beddelka ah ee Shaqaalaha. Wakhtiyada qaarkood Macmiilka/Loo shaqeeyaha waxa uu ubaahan doonaa caawimada Maareeyaha Kiiska/Wakiilka Gaarka ah/Isku duwaha Adeega si uu u helo beddelka habboon ee adeeg bixiyaha.

Sababteen ugu baahanahay inaan buuxiyo Foomka Codsiga Magacaabida Ka faa'iidaystaha?

Foomka Codsiga Magacaabida Ka faa'iidaystaha waxa uu kuu oggolaadaa inaad magacowdo ka faa'iidaystaha, si loo helo dheef kasta oo PTO oo ku biirtay oo hadhay marka aad dhimato ka hor helida dheeftan. Haddii wax magacaabid ka faa'iidayste aan la samayn, ama haddii ka faa'iidaystahaaga la magacaabay aanu sii noolaan adiga ama hadduu aan la helin meesha ay joogaan, hadhaaga ku biiray waxaa la siin doonaa hawl fuliyaha hantidaada dhulka.

Sababteen u soo gudbinayaa W-9?

Sababtoo ah dheeftaada PTO waxaa looga fekeraa dakhli la cashuuri karo, Xarunta bixinta dheefta waxaa looga baahan karaa celinta macluumaadka ee IRS ee ku saabsan dheefta PTO ee adiga lagu siiyo. Si loo dhammaystiro fayl garaynta, Xarunta bixinta dheefta waxay haysaa Foomkaaga W-9 ee la buuxiyey.

Miyaa lagu Siin kara dheefta Wakhtiga Fasaxayga iyaddoo la marayo Lacag dhigista Tooska ah?

Xarunta bixinta lacagta sahaminaysa suuragal ahaanshaha isticmaalka Lacag dhigashada tooska ah ee lacag bixinta dheefta PTO mustaqbalka dhow. Bisha maayo 2019, Xarunta bixinta lacagta waxay u bilowday barnaamijka tijaabada ah ee lacag dhigista tooska ah dhowr ka qayb galayaal ah (kuwan u qalma dheefaha PTO, oo W-9 faylka ugu jiro Xafiiska Maamulka Xarunta bixinta lacagta oo helay tilmaamida xaga Dhacdada Waxbarashadda) hadafkuna yahay siinta dheeftan dhammaan ka qayb galayaasha 2020.

Goormaan helayaa dheefahayga PTO?

Haddii ay kuu biireen dheefaha PTO, waxaad codsan kartaa dheefahan wakhti kasta addoo soo gudbinaya foomka codsiga dheefta Xafiiska Maamulka Xarunta dheefta. Haddii aanad soo gudbin codsiga oo xafiiska Maaliyada uu ugu jiro fayl Foomkaaga W-9 ee la buuxiyey, Xarunta bixinta dheeftu si toos ah waxay u soo diri doontaa dheefahaaga PTO adiga jeeg ahaan gudaha Febraayo ee sanadka ka dambeeya sanadka aad biirsatay dheefahaaga. Fadlan ka tasho Taariikhdaada si aad U xusuusato faahfaahinta dheeraadka ah.

Maxaan u bixinayaa khidmada jeega la tirtiray?

Bangiyada waxay kharash ka qaadaan sidii ay u tirtiri lahaayeen jeega ka dib

markii la soo saaray. Sababtan awgeed, waxaanu ku dhiirigelinaynaa ka qayb galayaasha inay sugaan ugu yaraan toban maalmood oo shaqo ka dib marka jeega la soo saaray ka hor inta aanay codsan jeeg cusub.

Waxaan gudbiyey Foomka Codsiga Dheefta. Goorma ayaan heli doonaa jeegayga Wakhtiga Fasaxa Lacagta la bixiyo?

Haddii aad u qalanto Dheefaha Wakhtiga Lacagta la bixiyo oo aad soo gudbiso Foomka Codsiga Dheefta, fadlan niyada ku hay muddada wakhtigan:

- Foomamka Codsashada Dheefta la soo gudbiyey 5ta bisha waxaa loo diyaarin doonaa lacag bixinta 15ka bisha.
- Foomamka la soo gudbiyey inta u dhexaysa 6ta iyo 20ka bisha waxaa loo diyaarin doonaa lacag bixinta jimcaha u dambeeya bisha.
- Foomamka la soo gudbiyey ka dib 20ka bisha waxaa loo diyaarin doonaa lacag bixinta 15ka bisha soo socota.

Marka foomka la habbaynayo, fadlan oggolow toban maalmood oo shaqo oo kale ee jeegaaga Wakhtiga fasaxa lacagta la bixiyo si uu u yimaado. Haddii aad filayso jeega Mushaharka Wakhtiga fasaxa la bixiyo oo aad dareento inay kaaga luntay warqaddu boostada, la xidhiidh Xafiiska Maamulka Xarunta bixinta lacagta: 844-507-7554, Doorshada 3 ka dib Doorashada 2.